

Waalidku sidoo kale wuu Tiriyaan

Ka caawinta ilmahaaga – Nidaamka iyo Aljabrada

Nidaamyada waxay ka dhex dhacaan xaalado maalmeed badan. Algebra waa hal hab oo lagu soo gudbin karo nidaam. Si loo garto nidaamka, carruurta waxay u baahan yihiin inay lahaadaan faham cad oo ah waxa uu yahay nidaamku. Xisaabta, eryga ah qaab wuxuu ka hadlayaa nidaamyo soo noqnoqanaya. Berigii hore Dugsiga Hoose/Dhexe, carruurta waxay baranayaan inay gartaan, sameeyaan, sharxaan iyo inay sii wadaan nidaamyadaas soo noqnoqanaya. Waxay u baahan doonaan inay gartaan imisa qaybood (ama walxood) ee sameeya nidaam. Bilow ahaan nidaamyadaan waxaa laga yaabaa in laga sameeyey qaabab, sheyaal ama sawiro ka hor intaan laga dhigin qaabab badan. Isla marka ay carruurta horumaraan sannadaha dugsiga hoose/dhexe, waxay baranayaan inay helaan lambarada ka maqan nidaamka waxayna helayaan xirriirada u dhaxeeya isugeynta, kala goynta, iskudhufada iyo qaybta. Waxay sidoo kale sharxayaan nidaamyada hadal ahaan waxayna awoodi doonaan inay go'aamiyaan xeer ah inay sharxaan qaabka. Ardeyda dhigata dugsiga sare waxay baran doontaa inay isticmaalaan xarfaha metelaya tirooyinka iyo inay ka helaan in xaraf uu meteli karo meeshii tiro alaab ah.

Tusaale, ardeyda waxay bilow ahaan baranayaan xirriirka ka dhaxeeya lambarada sida, $3+4=4+3$. Si loo sharxo xirriirka guud, 3 iyo 4 waxaa lagu bedeli karaa xarfaha ah a iyo b , saa daraadeed waxaan odhan karnaa, $a+b=b+a$. Xarfaha a iyo b waxay u taagan yihiin laba shay oo kasta . tirada alaabta way isbedeli kartaa laakiinse xirriirku wuxuu ahaanayaa mid isku mid ah.

Maxaad ku sameyn kartaa guriga?

Carruurta yar yar:

- Kala hadal lambarada guryaha wadada ku yaal weydiina ilmahaaga inuu sharxo waxa ku dhacaya lambarada isla markaad wadada mareysaan.
- Eeg tusaalayaasha ku qoran warqada derbiga kana hadal qaabkooda. *Intee qaybood ama walxood ayaa sameynaya nidaamkan? Xaggee buu ka bilowdaa nidaamkan? Intee jeer baa lagu soo celceliyey warqada dhexdeeda?*
- Haka sameeyo ilmahaagu warqada wax lagu laabto qaabab laysku soo celcelinayo oo ku dul sameysan.
- Ciyaar ciyaaro ku lug leh ficilada jirka sida sacabka cagaha dhulka ku dhufashada. Weydii ilmahaaga inuu ku celceliyey nidaamkaas ka dibna uu kuu sameeyo adiga nidaam aad ku celceliso.
- Ilmahaagu ha isticmaalo kuulo, badhamo ama biinka dharka lagu qabto si uu u sameeyo qaabab isku soo noqnoqanaya oo wax kaaga sheego nidaamka. Nidaamyada

waxay ku saleysnaan karaan midab, xajmi, qaab ama alaab (tusaale, biinka dharka, biinka dharka, qaado, biinka dharka, biinka dharka, qaado). Weydii ilmahaagu inuu sharxo nidaamka iyo inuu kuu sheeqo inta shey ee sameeya nidaamka.

- Isticmaal isku alaab oo loo dhigdhiigay si teel teel ah weydii ilmahaaga inuu kuu sharxo inuu yahay nidaamka wada socda.
- Weydii ilmahaaga inuu sameeyo nidaamka kala duwan ilaa intuu/intay awoodo isagoo ka sameynayo biinanka dharka oo ah saddex buluug ah, saddex caddaan ah iyo saddex casaan ah.

Carruurta kale:

- Ka caawi ilmahaagu inuu abuuro kuulaha laysku qurxiyo.
- Bar ilmahaaga inuu wax tolo. Isagoo kordhinaya ama yareynaya tirada tolmo ee badanaa raacda nidaamka tolida.
- Simida dhulka iyo naqshada guriga waxaa badanaa ku jiri doona waxyaalo qaabab leh. Tusaale, gidaaro badan ama meelaha la xadhey waxaa ka mid ah hagaajinta nidaamyada. Weydii ilmahaaga inuu sharxo nidaamka.



- Raadi nidaamyada lambarada ku qoran jadwalka taariikhda. Waa maxay sababta ay u dhacaan nidaamka?
- Markaad gaadhi wado fogaan dheer ciyaar ciyaaraha tirada si aad u baadho nidaamyada sida *Garó tiradeyda (x)*. Tusaale,
 - *tiradeydu (x) waxay u dhaxeysaa 20 iyo 5; waa tiro dhaban ah oo ku dhufashadeedu leedahay lambarka 3.*
- Markaad daawaneyso ciyaaraha waxaad xisaabisaa dhibcaha ama baadh isugeynta dhibca dhalinta suurto galka ah. Tusaale :
 - Swans waxay dhaliyeen 4 gool iyo 3 gadaale rubuusaacii ugu horeeyey cayaarta. Intee dhibcood ayey dhaliyeen.
 - Bulldogs waxay dhaliyeen 12 dhibcood qaybtii ugu horeysay . waa maxay inta isugeynood ee isku day iyo goolal ee ku siinaysa dhibcahan.

